

# Macluumaadka caafimaadka, shaqada iyo dhaqaalaha xilliga COVID-19

Haddii Hay'adda Caafimaadka Bulshadu kuu sheegtay in aad guriga joogtid, waa kuwaan macluumaadka iyo taageerada aad heli kartid dhanka shaqadaada, badqabka goobta shaqada iyo arrimaha dhaqaalaha.

## Shaqadaada xilliga COVID-19

Waa ogsoon nahay in shaqadu ay aad muhiim u tahay. Fadlan joog guriga haddii aad xanuunsan tahay ama Hay'adda Caafimaadka Bulshadu ku fartay in aad guriga joogtid. Guriga oo aad joogtid oo aad is-go'doomisid, waxaad qoyskaaga iyo dadka kula shaqeeya ka badbaadineysaa in ay cudurka qaadaan.

### Gobolka B.C., shaqadaada kuma waayi kartid:



Guriga oo aad joogtid adoo u jirran COVID-19.



In aad guriga isku go'doomisid markii sidaa lagu faray.



Haddii aad shaqadaadii ku weyday sababaha kore midkood ee COVID-19 awgeed, fadlan wac **xafiska Xuquuqda Shaqada iyo Shaqaalaha Biritish Kolombiya** (B.C.). Waxaad heli kartaa in lagu soo diro foomka cabashada.



**Telefoon bilaash ah:** 1-833-236-3700 **Isniin ilaa Jimce** 7:30 a.m. ilaa 5:00 p.m.



### Sirtaada gaarka ah

Waxaad sameyn kartaa **cabasho qarsoon** oo aan loo-shaqeeyahaagu ogeyn haseyeeshee, ma ogaan doontid jawaabta wixii ay cabashadu ku dambeysay.

## Caafimaadkaaga iyo badqabka googta shaqada



Qof walba wuxuu leeyahay door uu gacan uga geysto ka hortagga COVID-19.



Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga rabaa qorshe badbaado ee COVID-19 si ay u badbaadiyaan shaqaalahooda.

### Shaqale ahaan, waxaad gacan uga geysan kartaa adoo:



Dadka kale u jirsada 6 fiit.



Qufaca/hindhisada ku daboolaya suxulkaaga.



Gacmahaaga oo aad u dhaqid si joogta ah.



Gurigaaga oo aad joogtid haddii aad xanuunsan tahay.

### Goob shaqo oo badqabta

Waxaad xaq u leedahay goob shaqo oo caafimaad iyo badqabta. Haddii aad u baahan tahay macluumaad iyo taageero dhanka arrimaha caafimaadka iyo badqabka goobaha shaqada, kuna jiraan sida looga xog warramo xaaladda goobaha shaqada aan badqabin, waxaad waci kartaa hay'adda magdhowga shaqaalaha Biritish Kolombiya ee WorkSafeBC, Isniin ilaa Jimce 7:30 a.m. ilaa 5:00 p.m.



**Telefoon bilaash ah:** 1-833-236-3700



**Telefoon bilaash ah:** 1-888-621-7233 **(1-888-621-SAFE)**

## Arrimaha walwalka lacagta

Taageero ayaad heli kartaa haddii aadan shaqeyn karin cudurka COVID-19 darti kana walwalsan tahayna dhanka lacagta.



### Taageero dhaqaale

Waxaad Dawladda Biritish Kolombiya (B.C.) ka heli kartaa Taageero Dhaqaale haddii aad qabtid baahi lacageed.



Si aad wax badan uga ogaatid, fadlan wac Adeegyada Taageerada Dhaqaalaha iyo Naafada:

1-866-866-0800

### Taageerada Xaaladda Degdegga ee Shaqaalaha Biritish Kolombiya

waa taageero \$1,000 hal mar la siiyo dadka awooddii ay ku shaqeyn lahaayeen uu saameeyey cudurka COVID-19.

Si aad u ogaatid in aad codsan kartid, wac Taageerada Xaaladda Degdegga ee Shaqaalaha Biritish Kolombiya, Isniin ilaa Jimce, 8:30 a.m. ilaa 4:30 p.m



1-855-955-3545 (gudaha B.C. kaliya)



1-778-309-4630 (B.C. dibaddeeda)



**Taageerada Gurmadka Xaaladda Degdegga Kanada (CERB)** waxay xoogaa teegeero dhaqaale ah siisaa shaqaalaha uu cudurka COVID-19 si toos ah u saameeyey.

Waxay heli karaan caawimaad dhaqaale muddo gaaban oo dhan \$500/asbuucii ( ilaa iyo 24 asbuuc).

Si aad u ogaatid in aad codsan kartid ama sida loo codsado, fadlan wac Hay'adda Maaliyadda Kanada:



1-833-966-2099

## Siyaabo kale oo taageero loo helo

Kooxo bulshada kala duwan ayaa kaa caawimi kara wixii walaac la xiriira shaqadaada, badqabka goobta shaqada iyo dhaqaalaha. Waxay kaloo kaa caawimi karaan sidii aad teegeero ku codsan lahayd. Waa kuwaan kooxaha qaarkood aad wici kartid. Waxaad u baahan kartaa qof ku hadla Af Ingiriiska oo kaa caawiya in aad samaysid wicitaanka koowaad.



**Options Community Services**  
(8 Af)



**Progressive Intercultural Society**  
(14 Af)



**S.U.C.C.E.S.S.**  
(18 Af)



**Archway Community Services**  
(21 Af)

### Luuqadaha

Chinese, Spanish, Somali, Punjabi iyo kuwo kale.

Arabic, Korean, Vietnamese, Punjabi iyo kuwo kale.

Chinese, Spanish, Arabic, Korean iyo kuwo kale.

Chinese, Arabic, Punjabi iyo kuwo kale.

### Goobaha

Surrey, Delta, White Rock

Surrey, Delta, White Rock

Coquitlam, Port Coquitlam, Port Moody, Maple Ridge, Surrey

Abbotsford, Chilliwack, Mission iyo Langley

### Telefoonka

604-596-4321

604-596-7722

Surrey  
236-333-3102, 236-808-2323

604-859-7681

Goobaha kale  
604-468-6069, 604-468-6022